| | |
|---|---|
| جمهورية مصر العربية<br>وزارة الأوقاف | 1 شعبان 1443هـ<br>4 مارس 2022م |

(1)

**Sakada iyo sadaqooyinka iyo kaalintooda xagga kobcinta bulshada**

Mahad Allaa iska leh, Allaha Caalamka oo kitaabkiisa Kariimka ku yiri:

**{وَأَقِيمُوا الصَّلاةَ وَآتُوا الزَّكَاةَ وَارْكَعُوا مَعَ الرَّاكِعِينَ}**

**(Ooga salaada, hixiyana sakada, lana rukuuca kuwa rukuuca)**

Waxaan qirayaa inuusan jirin Ilaah kale Alle mooyee oo aan lahayn mid wax la wadaago, waxaana qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxammad addoonkiisa uu yahay iyo rasuulkiisa, Allow nabadgalyo iyo naxariis iyo barako korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa iyo qofkii ku raacay wanaag ilaa maalinta qiyaame

Intaas kaddib:

Shareecada islaamka dadka waxay u dejisay nidaam bulsheed oo toosan, waxaana aasaas u ah isu naxariisasho iyo isku xirnaan iyo isbahaysi, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مَثَلُ الْمُؤْمِنِينَ فِي تَوَادِّهِمْ، وَتَرَاحُمِهِمْ، وَتَعَاطُفِهِمْ مَثَلُ الْجَسَدِ إِذَا اشْتَكَى مِنْهُ عُضْوٌ تَدَاعَى لَهُ سَائِرُ الْجَسَدِ بِالسَّهَرِ وَالْحُمَّى)**

**(Mu'miniinta tusaalahooda xagga isjacaylkooda iyo isu naxariisashadooda iyo isu dhimrintooda waa sida jirka oo kale, marka xubin ka sheegato jirka oo dhan dhafar iyo qandho ayuu ka sheegtaa),** wuxuu leeyahay (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ الْأَشْعَرِيِّينَ إِذَا أَرْمَلُوا فِي الْغَزْوِ أَوْ قَلَّ طَعَامُ عِيَالِهِمْ بِالْمَدِينَةِ؛ جَمَعُوا مَا كَانَ عِنْدَهُمْ فِي ثَوْبٍ وَاحِدٍ ثُمَّ اقْتَسَمُوهُ بَيْنَهُمْ فِي إِنَاءٍ وَاحِدٍ بِالسَّوِيَّةِ، فَهُمْ مِنِّي وَأَنَا مِنْهُمْ).**

**(Ashcariyiinta markay xiliga dagaalka hanti waayaan ama cuntada caruurtooda magaalada ku sugan ay yaraato waxay ku soo ururiyaan hal weel waxa ay haystaan, kadib ayay ugu qeybsadaan si isla eg, iyaga way iga mid yihiin anigana iyagaan ka mid ahay)**

Sidaa awgeed islaamka wuxuu jideeyay sakada wuxuuna ka dhigay tiirarkiisa, wuxuu ku boorriyay sadaqada wuxuuna ka dhigay albaabada khayrka kan ugu weyn, taasoo kaalin ka qaadanaysa inay daboosho baahida dadka tabaalaysan, iyo inay dhibka ka qaaddo, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa ah (SW):

**{خُذْ مِنْ أَمْوَالِهِمْ صَدَقَةً تُطَهِّرُهُمْ وَتُزَكِّيهِمْ بِهَا}**

**(Ka qaad xoolahooda xagooda sadaqo (zakada) ood ku daahirin kuna nadiifin)**, wuxuu leyahay Alle (SW):

**{وَمَا أَنْفَقْتُمْ مِنْ شَيْءٍ فَهُوَ يُخْلِفُهُ وَهُوَ خَيْرُ الرَّازِقِينَ}**

**(wax kaste ood bixisaan Eebaa idiin bedeli, Eebena isagaa u khayroon wax wax arsaaqa)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(بُنِيَ الإِسْلاَمُ عَلَى خَمْسٍ: شَهَادَةِ أَنْ لاَ إِلَهَ إِلاَّ اللَّهُ وَأَنَّ مُحَمَّدًا رَسُولُ اللَّهِ، وَإِقَامِ الصَّلاَةِ، وَإِيتَاءِ الزَّكَاةِ، وَالحَجِّ، وَصَوْمِ رَمَضَانَ).**

**(islaamka waxaa lagu dhisay shan: in la qiro in Ilaah kale jirin oon Alle ahayn iyo inuu yahay Muxammad rasuulkii Alle iyo in la oogo salaadda iyo in la bixiyo sakada iyo xajka iyo soonka Ramadaan)**

Qofkii fiirfiiriya quraanka kariimka wuxuu ogaanayaa in Alle (cazza wa jalla) uu ugu xiray sakada meelo badan faradka ugu weyn uguna sarreeya oo ah salaadda iyadoo kor loo qoodayo

arrinkeeda, taasna waxaa boorrin laysku boorrinayo gudashadeeda, wuxuu leeyahay Allaha xaqqa (SW):

**{وَأَقِيمُوا الصَّلاَةَ وَآتُواْ الزَّكَاةَ وَمَا تُقَدِّمُواْ لأَنفُسِكُم مِّنْ خَيْرٍ تَجِدُوهُ عِندَ اللهِ إِنَّ اللهَ بِمَا تَعْمَلُونَ بَصِيرٌ }،**

**(Salaaddana ooga sakadana bixiya waxaad u hormarsataan Naftiina oo khayr ah waxaad ka helaysaan Eebe agtiisa, Eebana waxaad camalfaIaysaan waa arkaa)** wuxuu leeyahay Allaha sarreeya:

**{الَّذِينَ يُقِيمُونَ الصَّلَاةَ وَيُؤْتُونَ الزَّكَاةَ وَهُم بِالْآخِرَةِ هُمْ يُوقِنُونَ}.**

**(Ee ah kuwa Ooga Salaadda oo Guta Zakada oo Aakhiro Yaqiinin).**

Sidoo kale shareecada islaamka waxay ka digtay in la fududeysto gudashada sakada wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{وَلَا يَحْسَبَنَّ الَّذِينَ يَبْخَلُونَ بِمَا آتَاهُمُ اللَّهُ مِنْ فَضْلِهِ هُوَ خَيْرًا لَهُمْ بَلْ هُوَ شَرٌّ لَهُمْ سَيُطَوَّقُونَ مَا بَخِلُوا بِهِ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَلِلَّهِ مِيرَاثُ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضِ وَاللَّهُ بِمَا تَعْمَلُونَ خَبِيرٌ}،**

**(Yeyna u malaynin kuwa ku Bakhayli wuxuu Siiyey Eebe oo Fadli ah inay Khayr u Tahay, Sharbayse u Tahay waxaana Luqunta loo Galin waxay ku Bakhaylayeen Maalinta Qiyaame, Eebaana iska leh Dhaxalka Samaawaadka iyo Dhulka, Eebana waxaad Camal Falaysaan waa Ogyahay)**, wuxuu leyahay Allaha weyn:

**{وَالَّذِينَ يَكْنِزُونَ الذَّهَبَ وَالْفِضَّةَ وَلَا يُنْفِقُونَهَا فِي سَبِيلِ اللَّهِ فَبَشِّرْهُمْ بِعَذَابٍ أَلِيمٍ * يَوْمَ يُحْمَى عَلَيْهَا فِي نَارِ جَهَنَّمَ فَتُكْوَى بِهَا جِبَاهُهُمْ وَجُنُوبُهُمْ وَظُهُورُهُمْ هَذَا مَا كَنَزْتُمْ لِأَنْفُسِكُمْ فَذُوقُوا مَا كُنْتُمْ تَكْنِزُونَ}،**

**(kuwa kaydsada dahabka iyo fiddada oon ku bixinayn jidka Eebe ugu bishaaree cadaab daran * maalinta lagu gubi xoolahaas dartood naarta jahannamo ay ku guban wajiyadoodu iyo dhinacyadoodu iyo dhabarkoodu oo lagu odhan kani waa waxaad u kaydsanayseen Naftiinna ee dhadhamiya waxaad kaydsanayseen ciqaabtiisa)**, wuxuu leeyahay sayidkeena Cabdullaahi bin Cabbaas (Alle raalli haka noqdee) : seddex aayadood seddex ayay ku xiran yihiin, mid

lama aqabalo iyadoon la socon midda xuran (**adeeca Alle iyo rasuulka**) qofkii Alle adeeco oon rasuulka adeecin lagama aqabalayo, (**salaadda ooga sakadana bixiya**) qofkii tukado salaadda oon sakada bixinin lagama aqbalayo (**igu shukri aniga iyo labadaada waalid**) qofkii Alle ku shukriyo oon ku shukrinin labadiisa waalid lagama aqbalayo).

Shaki kama taagna in sadaqooyinka ay xoojiyaan kaalinta sakada xagga doorka bulshada, sidaa awgeed sharciga xaniifka ah wuu ku boorriyay wuuna ku dadaalay, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ فِي الْمَالِ لَحَقًّا سِوَى الزَّكَاةِ)**

**(Maalka waxaa ku sugan xaq aan sakada ahayn)** kadib wuxuu akhriyay oraahda Alle:

**{لَيْسَ الْبِرَّ أَنْ تُوَلُّوا وُجُوهَكُمْ قِبَلَ الْمَشْرِقِ وَالْمَغْرِبِ وَلَكِنَّ الْبِرَّ مَنْ آمَنَ بِاللَّهِ وَالْيَوْمِ الْآخِرِ وَالْمَلَائِكَةِ وَالْكِتَابِ وَالنَّبِيِّينَ وَآتَى الْمَالَ عَلَى حُبِّهِ ذَوِي الْقُرْبَى وَالْيَتَامَى وَالْمَسَاكِينَ وَابْنَ السَّبِيلِ وَالسَّائِلِينَ وَفِي الرِّقَابِ...}.**

**(Samo falku ma aha inaad wajiga u jeedisaan qorrax ka soo bax iyo qorrax u dhac, laakin samafale waa ruuxii rummeeya Alle, iyo Qiyaame iyo malaa'igta iyo kitaabka (kutubta Alle), iyo nabiyada, oo siiya xoolaha isagoo jecel qaraabada, iyo agoonta, iyo masaakiinta, iyo musaafirka, iyo kuwa tuugsada qoor xureyn…)**

****

Mahad oo dhan waxay u sugnaatay Allaha caalamka, naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaato kan lagu khatimay nebiyada iyo rasuullada, sayidkeenna Muxammad (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee), iyo dhammaan ehelkiisa iyo asxaabtiisa.

Sakada iyo sadaqooyinka waxay leeyihiin miro badan, waxaa ka mid ah: in la helo barako iyo ajir weyn, wuxuu leeyahay Alle (SW):

**{يَمْحَقُ اللَّهُ الرِّبَا وَيُرْبِي الصَّدَقَاتِ}**

**(wuxuu tiraa Eebe Ribada wuxuuna badiyaa (barakeeyaa) Sadaqooyinka)**, wuxuu leeyahay Allaha sarreeya:

**{إِنَّ الَّذِينَ آَمَنُوا وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ وَأَقَامُوا الصَّلَاةَ وَآَتَوُا الزَّكَاةَ لَهُمْ أَجْرُهُمْ عِنْدَ رَبِّهِمْ وَلَا خَوْفٌ عَلَيْهِمْ وَلَا هُمْ يَحْزَنُونَ}**

**(kuwa rumeeyay xaqa, oo Camal fiican falay, oo Oogay Salaadda, oo Bixiyay sakada waxay ka mudan ajirkooda Eebahood agtiisa, wax cabsi ah iyo murugana korkooda ma ahaato)**, wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(مَا مِنْ يَوْمٍ يُصْبِحُ الْعِبَادُ فِيهِ إِلَّا مَلَكَانِ يَنْزِلَانِ، فَيَقُولُ أَحَدُهُمَا: اللهُمَّ أَعْطِ مُنْفِقًا خَلَفًا، وَيَقُولُ الْآخَرُ: اللهُمَّ أَعْطِ مُمْسِكًا تَلَفًا).**

**(Maalin ma jirto oo addoomaha ay waabariisanayaan hadday dhacdo labo malag ayaa soo degta, wuxuu oranayaa midkooda: ilaahayow sii midka waxa bixinaya badal, wuxuu oranayaa midka kale: ilaahayow sii midka wax reebanaya halaag).**

Waxaa ka mid ah: inay ka mid tahay sababaha caafiyada wuxuu leeyahay nabigeena (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(دَاوُوا مَرْضَاكُمْ بِالصَّدَقَةِ، وَحَصِّنُوا أَمْوَالَكُمْ بِالزَّكَاةِ، وَأَعِدُّوا لِلْبَلَاءِ الدُّعَاءَ)**

**(ku daaweeya bukaantiina sadaqo, hantidiinana sakada ku ilaaliya, baladana duco u diyaarsada),** wuxuu leeyahay nabiga (naxariis iyo nabadgalyo korkiisa ha ahaatee):

**(إِنَّ الصَّدَقَةَ تُطْفِئُ غَضَبَ الرَّبِّ وَتَدْفَعُ مِيتَةَ السُّوءِ).**

**(sadaqada waxay damisaa carada rabbiga waxayna reebtaa dhimashada qaabka daran)**

Sakada kaalin weyn ayay ku leeyahay inay isku dheellitirto bulshada oo ayna u keento kobcin bulsheed, taasna waxay ku sii ballaaranaysaa xagga sadaqooyinka ha ahaadaan sadaqooyin soconaya ama sadaqooyin guud ama qaab mashruucyo iyo samafal sida mashruuca qarashka udxiyada ama qarashka quudinta ama mashruucyada arradbixinta iyo dhisidda guryaha ama shaqa-abuuriidda iyo siyaabaha kale ee samafalka taasoo kaalin ka qaadanaysa in loo sugo daryeel banii-aadannimo qoysaska ugu madnaanta badan daryeelka ama kobcinta bulshada iyo goobaha daryeelka ugu mudnaanta badan.

Maxaa inooga baahi badan inaan sugno macaanida samafalka iyo xiriirka iyo isbahaysiga bulsheed ilaa jacaylka kor noqdo walaaltinnimadana ay faafto kobcintana ay suurtagasho.

**Ilaahayow xifdi dalkeena Masar iyo dhammaan dalalka caalamka**